

Xasan Sheekh Muumin

Caqligii Wanaagsan [from *Shabeelnaagood*]

Gorayadu ilmaheed
aroori bay dhigtaayoo
aboodigu ku laayaa,
shimbirtuna aroosay
ilaxidhoo ammaana bay
ubadkeeda seexisaa.

Kala awran labaduye
edebtiyo aqoontiyo
asluubtay isku dhaafeen.
Caqligii wanaagsani
itaal in uu ka roon yahay
bal eegoo u fiirsada.

Ilka weynoo maroodigu
aradu mirtaa buu
cadawgu ku ugaadhaa,
aboorkuna duddumadaan
aragnay buu dhistaayoo
naftiisa ku ilaashaa.

Kala awran labaduye
edebtiyo aqoontiyo
asluubtay isku dhaafeen.
Caqligii wanaagsani
itaal in uu ka roon yahay
bal eegoo u fiirsada.

Ma ogtahay sagaaradu
awarahay qoddaayoo
saaladeeda ku aastaa,
libaaxuna ma asturee
hilimaduu ka arooruu
digadiisa ku aslaa.

Kala awran labaduye
edebtiyo aqoontiyo
asluubtay isku dhaafeen.
Caqligii wanaagsani
itaal in uu ka roon yahay
bal eegoo u fiirsada.

Xasan Sheekh Muumin***Good Sense [from Shabeelnaagood]***

*The ostrich places
Her young in the open
Where the hawk kills
But the small bird marries
And beds her young
In a nest that's safe*

*Different in size, the two
In manners, wisdom
And sense are opposite
See how good sense
Is superior to strength
And think on it.*

*The elephant with large tusks
Grazes at night in land
Where the enemy hunts him
But the termite builds
The mound we see
Protects himself within it.*

*Different in size, the two
In manners, wisdom
And sense are opposite
See how good sense
Is superior to strength
And think on it.*

*Do you know the dikdik?
She digs at the dust
Buries her droppings
But does the lion conceal his?
The path to the watering hole
He stains with his dung.*

*Different in size, the two
In manners, wisdom
And sense are opposite
See how good sense
Is superior to strength
And think on it.*